# Tilmaamaha Bixinta ka dib Suuxinta Guud

**General Anesthesia Discharge Instructions - Somali**

## Maxay yihiin qodobada muhiimka ah?

Saameynta suuxinta guud waxay ku jireysaa jidhkaada 12 ilaa 24 saacadood. Inta lagu jiro wakhtigaas waa muhiim inaad nasato oo qof kula joogaa.

Suuxinta guud ka dib waxaa dhici kara lallabbo iyo mantag. Si looga hortago in taasi dhacdo, waxaa muhiim ah in aad tartiib tartiib oogu bilowdo cuntada iyo cabitaanka

## Sideen u hagaajin karaa cuntada ilmaheyga?

Cuntada ugu horeysa waa inay ku bilaabataa cabitaano saafi ah sida Jell-O, casiir, POP, ama maraq. Ka dib, tijaabi cunto fudud ama aan dhadhan iyo khawaash laheyn. Haddii mantag ama lallabbo timaado, waxbo ha cunin oo ha cabbin hal ilaa labo saac. Intaas ka dib, mar labaad ku bilow cabitaanno saafi ah oo si tartiib tartiib ah ugu laabo cunto caadi ah. Caruurta tuubada caloosha lagu quudiyo, quudinta koobaad suuxinta ka dib waa inay noqotaa xawligii caadiga ahaa nuskiis. Ku dhiiri geli dareerayaasha, khaasatan inta lagu jiro 12 ka ilaa 24 ka saac ee ka dambeeya suuxinta.

## Maxaan u sameeyaa xanuunka iyo istareexa?

Xaddiga xanuunka aad dareemeyso way ka duwanaan doontaa waxa dadka kale dareemaan. Waxayna noqon doontaa mid aan la saadaalin karin. Haddii aad dareento xanuun ka badan mid aad ku xakameyn karto daawada xanuunka ee lagu siiyey, la xidhiidh khadka kalkaalisada 651-229-3890.

## Goorma ayaa hawlihii caadiga ahaa dib loo bilaabi karaa?

Suuxinta waxay saameyn doontaa isu dheelitirnaantaada iyo iskudubaridkaada muddo 12 ilaa 24 saac ah. Waxaa laga yaabaa inaad dareento dawakhaad ama wareer. Isku day inaad si

deggan u nasato iskana ilaali dhaqaaq degdeg ah. Qof masuul ah waa inuu guriga kuu kexeeyaa oo kula joogaa maanta.

24 ka saac ee soo socda, HA SAMEYNIN:

- Ha wadin gaadhi hana ka shaqeynin makiinadaha culculus.
- Ha sameynin in aad gaadho go'aan muhiim ah
- Ha cabbin khamro
- Ha taaban qalabka guriga ee halista ah ama mindiyaha jikada

## Maxaa dhacaya haddii aanan kaadin karin?

Haddii aadan awoodin in aad kaadido lix ilaa siddeed saacadood ka dib suuxinta, la xidhiidh khadka kalkaalisada **651-229-3890**.

## Goorma ayaan wacaa Gillette?

La xidhiidh khadka kalkaalisada

Haddii aad qabtid su'aalo ama walaac, ama haddii aad isku aragto mid ka mid ah calaamadaha soo socda:

- Qandho ka badan 101.5°F
- Xanuun aadan kaga nafisin daawada xanuunka
- Haddii aadan kaadin karin lix ilaa siddeed saacadood

La xidhiidh khadka kalkaalisada: **651-229-3890**

Macluumaadkan waxaa loogu talagalay ujeeddo waxbarasho oo keliya. Looguma talagalin in lagu beddelo talooyinka takhaatiirtaada daryeelka caafimaadka. Haddii aad wax su'aalo ah qabto, la hadal dhakhtarkaada ama kuwa kale ee ka tirsan kooxdaada daryeelka caafimaadka.

Haddii aad tahay bukaanka Gillette oo qabo su'aalo deg-deg ah ama walaac, fadlan kala xiriir Khadka Kalkaalisada 651-229-3890.

DIS004-SO; PAED-084
1/2026